



WAR SAXAAFADEED: Xasuuqa iyo xadgudubyada lagu hayo Shacabka Wadaniga ah ee Reer Sool, Sanaag iyo Cayn

Tixraac: PDF/011115

www.puntlanddiaspora.org

Taariikh: Maayo 24, 2010

publicrelations@puntlanddiaspora.org

Waxaa ururka Gollaha Qurba-joogta Puntland (Puntland Diaspora Forum) uu cambarayn tii ugu adkayd u soo jeedinayaa dhacdadii ay ciidama Itoobiyaanku sida sharci darradda ah ugu soo xadgudbeen Magaalada Buuhoodle halkaasi oo ay ku dileen tiro shacab ah oo ka badan 13 , gaadhsiiyeena dhaawacyo halis ah shacab kor u dhaafay 30 muwaadin oo Soomaaliyeed.

PDF iyadoo dareensan khatarta amni ee soohdinta labada dal, ayaa hada waxaa aad wax loola yaabo ah ku soo xadgudbida ay ciidamada Itoobiyaanku ku soo xadgudbeen dhulka Soomaaliyeed iyo xasuuqa arxan daro ee ay halkaasi ka gaysteenba. Waxaan aaminsanahay in dhacdadaani ahayd danbi weyn iyo gabood fal sharci daro ah. Dhacdadaani maahayn markii ugu horaysan ee ay ciidamo Itoobiyaan ahi si sharci daro ah ugu soo xadgudbaan magaalooyin Soomaaliyeed, dhacdooyinka isdaba jooga ahina waa mid muujinaysa sida ay Itoobiyaanku wax ixtiraam iyo tixgeli ah u siinay Qaranimada iyo madaxbanaanida dadka iyo dhulka Soomaaliyeed.

PDF waxay taageeraysaa mowqifka Cuqaasha iyo Siyaasiyiinta reer Buuhoodle ee ku aadan sugidda nabadgelyada iyo degenaanshaha Buuhoodle iyo nawaaxigeeda, waxaanuna ugu yeeraynaa Qurba-joogta Soomaaliyeed, UN iyo hay'adaha gargaarka inay taageero la gaaraan shacabka Buuhoodle, sida in la daweeyo dhaawaca, dib u dhisna lagu sameeyo wixii hanta iyo dhismayaal ah ee ku burburay dagaalkaasi.

PDF waxay Dowladda Itoobiya ugu yeeraysaa inay magdhow siiso eheladii dadkoodu ku nafwaayeen dhacdadaas, dawayso dhaawaca, ayna dib u dhiso hantidii halkaasi ay ku burburtay. PDF waxay kaloo Dowladda Itoobiya ugu yeeraysaa inay ka wantowdo ku xadgudubka Qaranimada iyo Madaxbanaanida dhulka Soomaaliyeed dibna aysan u samayn dhacdooyin la mid ah xasuuqa Buuhoodle. Dhacdooyinka noocan oo kale ahi waxay u adeegayaan sii hurinta nabadgelyo xumo iyo jawi colaadeed oo ka dhasha Gobolka, inagoo dareensan dhibaataada ka dhalatay ammi darada iyo degenaansha la'aanta Siyaasadeed ee ka taagan maanta Gobolka.

Gollaha Qurba-joogta Puntland wuxuu kaloo cambaaraynayaa jabhada Somaliland kuwaas oo tacadiyo ka gaystay deegaamadda Widh-Widh iyo Balli-Halac. PDF waxay dhalaycaysaa dhimasha shacabka ay laayeen Jabhada Somaliland kadib markay isku dayday inay qabsato Degmada Widh-Widh, tacsina u diraysaa eheladii dadkoodu ku geeriyooden Buuhoodle, Widh-Widh iyo Balli-Halac. PDF waxay ayidsantahay iska caabinta ay Shacabka Widh-Widh iska celiyeen Jabhada Gooni-goosadka Somaliland taas oo ka duulaysa ahdaafteeda ku salaysan kala goynta Ummada Soomaaliyeed ee walaallaha ah. Ahdaafta Gooni-goosadka Somaliland waxuu asal u yahay colaada iyo nabadgelyo xumada ka taagan Gobolada waqooyi, taas oo aanu aaminsanahay inay tahay calaamad kale oo muujinaysa aragtida guracan ee dhow ee maamulka Hargeisa.

PDF waxay ugu yeeraysaa dhamaan reer Puntland inay la yimaadaan takhdiid camali ah kaas oo xaqiijin kara amniga iyo istiqraarka goboladooda. Xadgudubyada Somaliland iyo daqdiga milateri ee ay ku haysto deegaamada Sool, Sanaag iyo Cayn wuxuu sababay dacadiyo iyo dhibaatooyin badan oo soo gaadhay shacabkaas. Gaboodfalka ay Somaliland ku hayaan shacabka Laas-caanood waa mid aan indhaha laga saaban karin, qaatayna dhowr sano, taas oo ka dhigtay shacabkii magaaladaasi wax qaxa, ama handadaad, xarig, xabsi iyo caga juglayn joogta ah lagu hayo, sidaa awgeed, waxaa la gaadhay wakhtigii ay reer Puntland midoobi lahaayeen waxna ka qaban lahayeen khadiyada Laascaanood.